Diiwaan gelinta Guryaha Ijaarka ah ee La degan yahay & Schedule R

Golaha Magaalada ayaa Barnaamijka Diiwaan gelinta Guryaha Ijaarka ah ee La degan yahay ansixiyay Luulyo 2018.

Xeerka Magaalada Portland 7.02.890 ayaa faraya **diiwaan gelinta sanadlaha ah** ee hantida guryaha ijaarka ah ee la degan yahay ee dhammaan mulkiilayaasha hantida guryaha ijaarka ah ee la degan yahay ee loogu talagalay sanad cashuureedka bilaabmaya muddo ku beegan ama ka dib Janaayo 1, 2018 (ee waqtigeedii la buuxin lahaa la gaaray ee loogu talagalay inta badan dadka canshuurta xaraynaya marka la gaaro Abriil 15 sanadka). Hawsha dhanka ijaarka iyo cinwaanada goobta ijaarka ah ayaa la iskaga baahan tahay si loo buuxiyo foomka Schedule R oo loogu soo lifaaqo Xaraynta Canshuurta Ruqsadda Ganacsi. Ku guuldareysiga in aad soo gudbiso canshuur celintaada ama dokumentiyada canshuurta ee la xiriira, oo ku jiro foomka Schedule R, waxay keeni kartaa ciqaab.

Foomka "Schedule R" iyo Macluumaadka Xaraynta

- **Lacagta diiwaan gelinta** $60 gurigiiba
- **Taariikhda ay ku aadan tahay:** Sanadkiiba marka la gaaro Abriil 15 (oo loogu talagalay inta badan dadka canshuurta xaraynaya)
- Riix meesha la sii gelayo ee hoosta ee loogu talagalay tilmaamaha sida loogu gudbiyo Waaxda Dakhliga.

Boosto ama dhanka internet-ka ugu gudbi Waaxda Dakhliga Soo dejiso Schedule R

Haddii aad leedahay 10 guri ama ka badan, oo aad rabto in aad elektaroonig ahaan u gudbiso Schedule R aad leedahay, fadlan isticmaal xaashida Soo dejinta Isku diiwaan gelinta Guryaha Ijaarka ah ee La degan yahay. (Waaxda Dhakhliga)

Su’aalaha Inta Badan la Isweydiiyo (FAQ)

1. **Ayaan la xiriiraa si aan u weydiiyo su'aalaha ku saabsan waxyaabahan la iskaga baahan yahay?** Dhammaan su'aalaha guud ee la xiriira xaraynta waa in lagu hagaajiyaa Waaxda Dakhliga.

2. **City of Portland Revenue Division**
   111 SW Columbia St., Suite 600, Portland, OR 97201-5840
   Email-ka: RevBurRentReg@portlandoregon.gov
   Xafiiska: (503) 823-5157
   Fax-ka: (503) 823-5192

3. **Hay'adaha aan faa'iido doonka ahayn:**Si loo xaqiijiyo/codsado waxyaabo ku saabsan in la isku daro liiska qaybaha wax laga reebay/dhaafay fadlan la xiriir Xafiiska Adeegyada Ijaarka.

4. **Maxaa la iskaga baahan si loo diiwaan geliyo guryo ijaar ah?** Dhammaan mulkiilayaasha hantida guryaha ijaarka ah ee la degan yahay waa in ay diiwaan gelintooda hantida guryaha ijaarka ah ee la degan yahay (Schedule R) la soo gudbiyaan xareynta Canshuur Celintooda Ruqsadda Ganacsi ee Magaalada Portland iyo Degaanka Multnomah.
5. **Waa maxay sababta la iiga baahan yahay in aan diiwaan geliyo gurigayga?** Sida uu farayo Xeerka Magaalada Portland 7.02.890, dhammaan mulkiilayaasha hantida guryaha ijaarka ah ee la degan yahay ee ku nool Magaalada waxaa looga baahan yahay in ay diiwaan geliyaan hantidooda ijaarka ah iyaga oo sanad kasta bixinaya foom uu ku jiro cinwaanka dhammaan guryaha ijaarka ah ee la degan yahay ee ku yaala Magaalada dhexdeeda.
6. **Miyaa la iga dhaafay bixinta canshuuraha. Miyaan weli la iiga baahan in aan diiwaan geliyo gurigayga ijaarka ah?** Haa. Dhammaan mulkiilayaasha hantida guryaha ijaarka ah ee la degan yahay waa in ay diiwaan gelintooda hantida guryaha ijaarka ah ee la degan yahay (Schedule R) la soo gudbiyaan Canshuur Celintooda Ruqsadda Ganacsi.
7. **Waa maxay wakhtiga kama dambaysta ah ee loo qabtay diiwaangelinta?** Sanad canshuureed kasta, diiwaan gelinta ayaa wakhtigeedii la joogaa, oo loogu talagalay inta badan dadka canshuurta xaraynaya, marka la gaaro Abriil 15 ee jadwal sanadeedka soo raaca sida xaraynta canshuuraha dakhliga ee federaalka iyo gobolka ee kale. Haddii aad xareyso Canshuur Celinta Ganacsi Isku-dhafka ah oo ku saabsan

kordhinta, waxaad xareyn kartaa Schedule R ee leedahay oo ay weheliso Canshuur Celinta Ganacsi Isku-dhafka ah wakhtigaasi.

8. **Waa maxay foomamka aan u baahanahay?** Schedule R *iyo* xareynta Canshuur Celintooda Ruqsadda Ganacsi ee Isku-dhafka ah ee Magaalada Portland iyo Degaanka Multnomah.
9. **Waa maxay macluumaadka aad iiga baahan tihiin?** Hawsha dhanka ijaarka iyo cinwaanada goobta ijaarka ah ayaa looga baahan tahay foomka la xiriira Canshuur Celinta Ruqsadda Ganacsi – Schedule R.
10. **Halkee baan ka helaa foomka?**

    1. Booqo Foomamka Waaxda Dakhliga
    2. Soo dejiso oo buuxi Schedule R – Diiwaan gelinta Guryaha Ijaarka ah ee La degan yahay
    3. Foomka Schedule R oo dhammeystiran oo uu la socdo xaraynta canshuurtaada ganacsi boosta ugu soo dir:

    City of Portland Revenue Division
    111 SW Columbia St., Suite 600
    Portland, OR 97201-5840

11. **Miyay jirtaa lacag laga qaado diiwaan gelinta guriga ijaarka ah?** Haa, kharash la isla qaadayo ee la qiimeeyay waxaa loogu talagalay dhammaan guryaha la degan yahay ma ahan kuwa sharciga loo dejiyay ee gaarsiisan ama ka hooseeya 60% AMI. Guryaha la degan yahay ee sharciga loo dejiyay ee gaarsiisan ama ka hooseeyo 60% AMI waa in ay xareeyaan Schedule R sanad kasta oo foomka korkiisa ku tilmaamaan kuwa ay yihiin guryaha sharciga loo dejiyay in la awoodi karo waana in laga dhaafaa bixinta kharashka.
12. **Maxaa dhacaya haddii aanan diiwaan gelin marka la gaaro wakhtiga kama dambaysta ah ee loo qabtay?** Ku guuldareysiga in la gudbiyo canshuuraha iyo dokumentiyada la xiriira sida Schedule R waxay keeni kartaa ciqaab ay soo rogto Waaxda Dakhligu.
13. **Waa maxay sababta ay Magaalada Portland u raadinayso in ay diiwaan geliso guryaha ijaarka ah?** Ujeedada laga leeyahay dadaalka Portland ee Diiwaan gelinta Guryaha Ijaarka ah ee La degan yahay waa si loo abuuro liis cusub oo la isku haleyn karo ee guryaha guryaha ijaarka ah ee ku yaala Magaalada.